

TIXRAACA BAARITAANKA TAARIIKHDA DAMBIGA

Waa siyaasada Gudiga Waxbarashada in qofna laga shaqeysiin karin ama oo si firfircoon uga shaqeynin Degmada ilaa qofkaas oo maro tixraaca baaritaanka taariikh dembiyeedka iyo loo fasaxo shaqaaleysiinta ama shaqada sida oo dhigaayo Sharciga Waxbarashada Gobolka New York iyo xeerarka u degsan Gudoomiyaha Waxbarashada.

Ujeedooyinka siyaasadaan, ereyga, "diiwaanka taariikhda dembiyada" waxaa loola jeedaa diiwaanka dhamaan xukumada dembiyada iyo eedeymada dambi kasto oo wali la sugooyo ee lagu haysto qofka ee ku haysato Qaybta Adeegyada Cadaalada Dembiyada (DCJS) ama Xafiiska Baarista Federaalka (FBI). Shaqsiyaadka waa in loo fasaxaa shaqaalaynta marka Degmada ay ka hesho ogaysiinta Waaxda Waxbarashada Gobolka New York (SED) in shaqsiga loo fasaxay iyo laga yaabo inoo si sharci ah ugu shaqeeyo Degmada.

Kahor inta aan la bilaabin nidaamka baaraaritaanka taariikhda dembiyada, Degmada waa in ay siiso codsada dhamaan ogeysiisyada iyo macluumaadka looga baahan yahay Sharciga Waxbarashada Gobolka New York iyo qawaaniinta Gudoomiyaha Waxbarashada iyo qaabka iyo habka lagu qeexay.

Dhamaan diiwaanada taariikhda dembiyada ee ay baaraan DCJS iyo FBI iyo loo diro Gudoomiyaha Waxbarashada waa sir iyo mala daabici karo ama mala shaacin karo dad aan ka ahayn Gudoomiyaha ilaa si kale oo sharciga u ogolaado.

Yee Tahay In Faraha Laga Qaado?

Sida uu qabo sharciga Gobolka New York, dhamaan "shaqaalaha mustaqbalka" ee Degmada waa in laga qaadaa faraha. Marka loo eego xeerarka lagu dabaqi karo ee Sharciga Waxbarashada iyo Xeerarka Gudoomiyaha, "shaqaalaha mustaqbalka" waxaa loola jeedaa shaqsi kasto oo ay Degmada si macquul ah uga filanayso inoo bixiyo adeegyada ku lug leh xiriir toos ah, macnaha qof ahaan, xiriir waji ka waji ah ama isdhexgal, ee ardayda da'dooda ka yar tahay kow iyo labaatan jir (21) iyo kuwaas oo ah:

1. Raadinaayo boos magdhow ah ee Degmada iyo aan hada u shaqaynin Degmada ama arday ku jiro barnaamijka waxbarashad ee heerka fasalka ee Degmada; ama
2. Shaqaale bixiyaha adeegyada qandaraaska ee la siiyay Degmada oo la rabo in lagu meeleevo gudaha Degmada; ama
3. Shaqaale la rabo in lagu meeleevo gudaha Degmada iyadoo la raacaayo barnaamijka kaalmada shaqaaleysiinta dadweynaha sida waafaqsan Ciwaanka 9-B ee Qodobka 5aad ee Sharciga Adeega Bulshada, si toos ah ama qandaraas.

Shaqsiyaadka Sida Gaarka Ah Looga Saaray

Shaqsiyaadkaan soo socdo ayaa laga saaray shuruudaha baaritaanka diiwaanka dembiyada iyadoo la raacaayo siyaasadaan sida oo sharciga ogol yahay:

1. Kuwa rabo booska darawalnimada baska iskoolka ama kaaliyaha baska iskoolka iyo loo fasaxay shaqada sida waafaqsan Sharciga Baabuurka iyo Wadooyinka; ama
2. Kuwa hore u maray diiwaanka taariikhda dembiyada ee Degmada iyo kuwa bixiyay adeegyada Degmada sanad dugsiiyeedkii hore sida boos magdhow ah, ama shaqaale bixiyay adeegyada qandaraaska ah ee Degmada, ama sida shaqaale lagu meeleevo gudaha Degmada oo hoos

imaado barnaamijka shaqaaleysiinta kaalmada dadweynaha iyadoo la raacaayo cinwaanka 9-B ee qodobka 5 ee sharciga Adeega Bulshada sida tooska ah ama qandaraas; ama

3. Kuwa sida macquulka ah Degmada uga filayso in ay u fidiyaan adeegyada Degmada wax aan ka badnayn shan (5) maalmood ee adeegyada la qabto sanad dugsiyeedka, waase hadii ay Degmada u bixiso kormeer qof ahaaneed oo shaqsi ah hal (1) ama in ka badan oo shaqaale ah oo ka tirsan Degmada inta oo shaqsigaas bixinaayo adeegyaadan. Shaqsiyaadka bixiyo adeegyada waqtiga xadidan iyo kuwa la kormeero waxaa ku jiri karo laakiin maku koobnaan karaan fanaaniinta, barayaasha martida iyo kuwa hadlo, iyo kuwa kooxda ciyaaraha.

Shaqaaale kasto oo mustaqbalka ah oo hore looga qaaday faraha si oo u helo shahaado ama shaqo gudaha degmo dugsiyeed kale, oo farahiisa ay ku harsan yihiin faylka Waaxda Adeegyada Cadaalada Dembiyada (DCJS), waxaa loo baahan doonaa in lagu sameeyo baaritaanka taariikhda dembiyada laakiin ma looga baahnaa doono in mar kale laga qaado faraha.

Degmada waxay ku dhiirigelinaysaa shaqaalaha inay raadsadaan fursado cusub oo xiiso leh oo Degmada oo dhan marka la heli karo. Awooda dhaqdhaqaaqa shaqaalaha awgeed, Degmada waxay u tixgalinaysaa dhamaan shaqsiyaadka aqbalo shaqada Degmada inay yihiin "shaqaalaha mustaqbalka" iyo waxay u baahantahay in dhamaan shaqsiyaadkaas faraha laga qaado.

Kala Soocida Shaqada

Mar kasto oo shaqaalaha ama shaqaale faraha laga qaaday ay ka soocaan Degmada, Degmada waa inay isla markiiba ogaysiisaa SED ka soocida iyo taariikhda. Ogeysiiska noocaan ah waa inoo ahaadaa qaab iyo foomka ay qortay SED.

Tixraac aan Xeerka Baaritaanka Taariikhda Dambiyada (9200-R)
toos aheyn:

Xeerka Waxbarashada § 305(30), § 2554, § 3004-b, § 3004-c, § 3035

Xeerka Toosinta Qodobka 23-A

Sharciga Fulinta 296(16)

Xeerka Adeegyada Bulshada Qodobka 5, Ciwaanka 9-B

8 Xeerka New York ee Xeerarka iyo Nidaamka (NYCRR) Qaybaha 80-1.11 iyo Qaybta 87

Xasuus qoraal: La qaatay Luuliyo 28, 2011 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2011-12: 104; Wax laga bedelay Abriil 27, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 627

ct/sg